

## Gacaliye/Gacaliso Caafimaad-doona:

Dhakhtarkaagu waxa uu weydiistay in aad keentid kaadi 24 saacaadood ah oo baadhitaan loogu talagalay. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan akhriska warkan, fadlan wac 612-863-4678. Akhri dhamaan fariimaha ka hor intaanad bilaabin ururinta kaadida.

Waxa lagu siiyay hal weel oo ah 3000 ml ama weel ururin kaadi oo labo ah. Si loo helo baadhitaan sax ah, fadlan qor Magacaaga, Taariikhda, iyo Wakhtiga aad weel walba ku bilaawday ururinta kaadida. Fadlan wax ku qor qalin khad ama qalinka calaamadeynta oo khadkiisu da'aynin ama rooraynin.

***Taxadir: Weelka kaadida ee 24-ka saacadood ah waxa laga yaabaa inay ku jirto asiidh ama aashito xoog leh ama nooc kale oo xafide ah. Kiimikooyinkaasi waxay keeni karaan gubniin hadday maqaarka taabtaan waxana laga yaabaa inay waxyeello leeyihiin hadday indhaha ku duulaan ama haddii la neefsado. Eeg taxadirka la socda warqadda warka. Ha isku dayin inaad faaruqisid ama daadisid kiimikada xafidaha ah. Fadlan taxadir yeello marka aad bilaabaysid ururintan. Haddii weelka aanay oollin qoraal digniin ah, wax kiimiko ah kuma jiraan weelka kaadida.***

### Fariimaha:

1. Kaadida iska faaruqi kuna shub kaadida ugu horeysa musqusha ama suuliga subixii. Qor wakhtiga saxda ah inta uu ahaa.
2. **DHAMAAN** kaadida ku xigta waa in lagu kaydiyo weelka lagu siiyay.
3. Kaadida ugu dambaysa waa inaad iska faaruqisid ama kaadidid 24 saacaadood oo sax ah ka dib kaadidii ugu horeysay. Waa in kaadida ugu dambaysa lagu daro ururinta 24-ka saacaadood ah.
4. Inta lagu jiro kaadi ururinta waxa lagugula talinaya inaad qaadatid cabbitaano caadi ah. Hase yeeshe, aalkolada ama khamriga waa inaad iska dhaaftid.
5. Waa in weelka kaadida qaboojiyaha la galiyo ama lagu kaydiyo baraf inta ururintu socoto.
6. Marka aad dhameysid shaybaadhka ama labaratooriga sida ugu dhakhsaha badan ugu soo celi kaadida la ururiyay 24-ka saacadood.

### Laba Jeer Ururin/Kaadi Qaybin:

- Ugu shub si dhakhso ah oo aan joogjoogsi lahayn.
- Ka dib marka qaadistu dhamaato, masafka kala-qaybinta si taxadir leh uga saar weelka.
- Gali furarka cascas godadka weelka.
- Gali masafka kala-qaybinta boorsada caagga ah ee la socotay alaabta ka dibna qashinka raaci.

### **GARGAARKA KOOBAAD EE LOOGU TALOGALAY KIIMIKOYINKA KU JIRA QURARADHA KAADIDA 24-KA SAACADOOD**

#### **NEEFSASHO:**

HA NEEFSAN UUMIGA. Haddii qofku neefsado uumiga kiimikada, qofka u saar hawada dibadda ama hawo cusub. Haddii qofku u neefsashadii joojiyay, u samee neef-siin ama neef-ku-afuufid. Haddii neefsashadu qofka ku adag tahay, sii oksijiin. Wac dhakhtar.

#### **LIQID:**

QOFKA MATAG HA KA KEENIN. Sii qofka tiro badan oo ah biyo ama caano haddii la heli karo. Marna qof suuxsan afka wax ha ka siinin. Isla markii ha la doonto gargaaar dhakhtar.

#### **TAABASHO MAQAAR:**

Marka ay dhacdo taabasho, isla markii maqaarka ku dhaq biyo badan ugu yaraan 15 daqiiqadood iyadoo isla markaana la saarayo dharka iyo kabaha wasakhoobay ama sumoobay. Wac dhakhtar.

#### **TAABASHO ISHA AH:**

Idhaha ku dhaq biyo badan ugu yaraan 15 daqiiqadood adiga oo galka sare iyo ka hoose ee isha marmar sare u qaadaya. Isla markii ha la doonto gargaaar dhakhtar.

### Mahadsanid.